

Iskuulka gu ma ku aaddan yahay bilowga sanad dugsi yedka?

SU'AALAH MUHIIMKA AH EE AY TAHAY IN AY WALIDADU WEYDIYAAN

Sanad dugsiyeed kan, dib-u-noqoshada iskuulka waxay umuqataa mid ka duwan sidii hore. Degmo kasta waxay sameyneysaa qorshe waxbarasho oo u gaar ah, Sidee ku ogaan kartaa in habka iskuul kaagu la kulmay calaamadaha/-sumadda? Qalabkani wuxuu bixiyaa su'aalo hagitaan ah oo kaa caawinaya sidii aad u dhex mari lahayd qorshaha deegaankaaga, iyo in la garto su'aalaha muhiimka ah ee la isweydiyo. Kadib markaad sahamiso qorshaha, Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad la xiriirto kormeeraha guud, guddiga iskuulka, iyo maamulaha si aad u hesho caddayn iyo u dood isbedel!

Xagee ka heli kartaa qorshaha iskuulkaaga? Ka bilow bogga/websaydhka degmo dugsiyeedkaaga. Waxaa looga baahan yahay inay soo dhajiyaan, waana inaad kuheli kartaa ilo ku-celis dugsiya iyo / ama agabyada COVID-19.

Mawduuc	Maxaa ku jira Qorshaha?	Su'aalo, Rajo, Baahi & Walaac
<p>1) Cabbirid hadii ardaydu yahiin diyaar: Majiraa qorshe lagu aqoonsado Aagagga in uu ardaygaygu u baahan yahay in laga caawiyayo is daba qabad? Tan ayaa badanaa la cabiraa iyada oo loo marayo "qiimaynta ogaanshaha" ama Tijaabada baarista bilowga sanadka.</p>		
<p>2) Taageerada iyo is Dhex Galka Si Loo Caawino Ardayda is daba qabad ka: Ma jiri doonaan wax taageero gaar ah oo loogu talagalay ardayda u baahan Caawin ka dib markaad iskuulka ka maqantahay? Ma yihiin cilmi-baaris lagu taageeray oo la xaqiijiyay inuu yahay wax ku ool ah? Tusaalooyinka waxaa ka mid ah umeerin, waqti kororsi, iyo taageero-mid-dhamaystiran ah.</p>		
<p>3) Darajooyinka: Sidee ayuu ardaygu u noqon doona darajo hela? G-DH, Gudub /dhicid, Deyn la'aan, iwm.)</p>		
<p>4) Jawaab-celinta laga helo Macallimiinta: Sidee bay macallimiintu u siin doonaan jawaab celin ardayda inta lagu jiro wax barashada masaafada? Sidee ardaydu ugu wareejinayaan / u-celinayaan meeleynta? Immisa jeer bay heli doonaan jawaab celin?</p>		
<p>5) Casharrada Waqtiga-Dheer: Intee jeer ayey ardaydu heli doonan fursad ay wax ku bartaan (oo-isku-mid ah)? Casharrada miyaa la keydin doonaa haddii casharku dhaafo ardayga?</p>		

<p>6) Saacadaha Xafiisyada: Imisa jeer bay macalimiinta u diyaarin doonaan saacadaha xafiiska ardeyda si ay ugu xirmaan oo u weydiyaan su'aalo hal-hal ah? Ma joogi doonaan waqtiyo la heli karo? Miyay waaliddiinta heli doonaan fursado ay kula xariraan macallimiinta?</p>		
<p>7) Ardayda Naafada ah: Waa maxay taageerada iyo adeegyada gaarka ah e la siin doonaa ardayda baahida gaarka ah le (Qorshaha Waxbarashada Shaqsiyeed) IEPs? Miyey heli doonaan adeegyo ku habboon, fududeyn, iyo dib-u-habeyn? Miyay heli doonaan mudnaanta koowaad e helitaanka adeegyada shakhsiyaadka?</p>		
<p>8) Bartayaasha afka Ingiriiska: Side bartayaasha afka ingiriiska loo taageeri doonaa? Waa maxay adeegyada ay heli doonaan, sidee se loo taageeri doonaa waalidiinta?</p>		
<p>9) Caafimaadka Maskaxda: Maxay yihiin taageerada iyo / ama adeegyada caafimaadka maskaxda ay u heli doonan ardaydu? Sidee ayey ugu xiriiri karaan shaqaalaha bulshada, iyo la taliyayaasha?</p>		
<p>10) Helitaanka Internetka: Iskuulkaagu ma xaqiijiyay in uu ardey walba marin u helo internetka ? xulashooyinku ma noqon karaan kuwo waara oo lagu kalsoonaan karo?</p>		
<p>11) Kombuyuutaro iyo taableedo: Iskuulkaagu ma hubin doonaa in arday kasta lsiyo aalad u oggolaaneysa inay si buuxda ugu hawl galaan /qaybqaataan barashada masaafada?</p>		
<p>12) Cuntada Ardaga: Sidee ayaa ardayda qoysaska dakhligoodu hooseeyo ay u heli doonan cunno? Qorshuhu ma noqonayaa mid dabacsan oo ku filaan karaan dhammaan qoysaska baahan?</p>		
<p>13) Macluumaadka Waalidka: Sidee buu iskuulkaagu qoysaska u war-galinyaa, iyo intee ogeysiin ah ayay bixin doonaan kahor inta aysan badalin qaabka waxbarasho (tusaale., ku noqoshada isku-dhafka ama shaqsi ahaan)</p>		
<p>14) Fasallo Ammaan ah: Qof ahaan (shakhsiyan) / wax barasho isku dhafan: Maxaa taxaddar ah oo iskuulkaagu u qaadi doonaa si loo hubiyo in bay'adda wax barashada ay u nabdoon tahay ardayda iyo dadka waaweyn: kala fogeynta, kooxaysiga, maaskaro u hoggaansamida, iwm. Sidee ayay u maamuli doonaan wixii kiisaska COVID-19 ee ardayda ah ama shaqaalaha?</p>		

